

# LIISKA BADBAADINTA DABKA GURYAHA

Fact Sheet 10 – Community Risk Management. Revised 28/09/2004 – Somali

- NSW FIRE BRIGADES
- NSW RURAL FIRE SERVICE
- ACT FIRE BRIGADE
- ACT RURAL FIRE SERVICE

## XAQIIQADA

Sannadkii hore 189 guri ayaa si xun u burburay xiligii dabka taas oo uu dabku ka dhashay meelaha dabka lagu shido, kulayliyayaasha iyo biyo kulayliyayaasha, 974 ayaa dab ka dhashay shooladaha, muufooyinka, meelaha wax lagu shiilo iyo qalabka kale ee wax lagu kariyo 592 dab waxa dhaliyey farsamo korontada oo xumaatay.

(Statistics correct as of 17/04/03)

## MA KA BADBAADSAN TAHAY DABKA GURIGA?

Dabdamiska NSW wuxuu kugula talinayaa liis kan fudud ee badbaadada si ay kaaga caawiso in uu gurigaagu ka badbaado gubashada.

- Ku xirista tiro alaamyada qiiqa ah oo ku haboon si joogto ahna loo tijaabiyo taas oo ka mid ah qorshaha badbaadada dabka guriga.
- Qoro qorshaha saboto bixinta haddii uu matalan dab dhaco si joogto ah oo aad u samyaysaa isku dayadaasna waa talaabada labaad.
- Hubi in mafaatiixda guriga oo dhami ay diyaar kuugu yihiin meel aad gaari karto haddii aad doonayso inaad ka saboto baxdo.
- Waligaa ha kaga tagin dabka wax karsamaya ama shamac ololaya iyadoon la ag joogin.
- Nadiifi filtarka qalajiyaha si joogto ah iyo mar kasta oo aad isticmaalayso.
- Waligaa sariirta sigaar ha ku kor cabin taxdir dheeraad ahna samee haddii aad khamro cabayso markaad sigaarka cabayso.
- Marka ay jiilaalka tahay taxdir dheeraad ah samee marka aad isticmaalayso kulayliyayaasha, bustayaasha korontada ama dabka furan.
- Godadka korontada si xad dhaaf ah ha u isticmaalin damina marka aanad isticmaalayn.
- Mar kasta ka fogee caruurta kabriidada laytarada una sheeg inaanay ahayn “wax lagu ciyaaro oo ay yihiin qalab la isticmaalo” waa in qof masuul ahi uun isticmaalaa.
- Haddii aad geerash leedahay ama makhaasiin daxdir dheeraad ah ka samee kimikooyinka iyo shidaalka yaalla mar kasta shidaalka ku sii shub mishiinada cawska lagu jaro, kuwa isku sima markaay qabowyihiin meel banaana yaalaan.
- Haddii aad isticmaasho gaas, koronto ama xaabada BBQga markasta hubi inay si fiican isugu xiranyihiin intaanad shidin ka hor qof weynina uu masuul ka noqdaa markala isticmaalayo. (Xaashida xaqiiqada No.16 ee badbaadad guud ee Barbequega)

Haddii aad ku nooshahay meelaha u nugul dabka kaymaha ka nadiifi caleemaha dhulka iyo xashiishka u dhow guriga xasuusnow inaad si joogto ahna u nadiifiso.

## WIXII MACLUUMAAD DHEERAAD AH LA XIRIIR XARUNTA DABDAMISKA AMA ILAALINTA DABKA DEGMADAADA AMA FIIRI WEBSITEKA

[www.fire.nsw.gov.au](http://www.fire.nsw.gov.au) [www.rfs.nsw.gov.au](http://www.rfs.nsw.gov.au) ama [www.esa.act.gov.au](http://www.esa.act.gov.au)

## Tilmaamaha badbaadada alaamka qiiqa

- Xusuusnow in qiiqa dabka ka soo baxa aad ku jaah wareeri karto taas oonad arki Karin wax qiiq ah.
- Haddii aad ka cararto dabka guriga, xasuusnow marka aad debada joogsatid in aad tilifoonisid lambarka 000
- U ogolow caruurta qorshaha ka sabtabixda dabka waana in isku dayo la sameeyaa ka hor intaan la samaynin qorshaha ka saboto bixinta.
- Haddii uu qof ka mid ah qoysku leeyahay dhibaato dhego cuslaan iyo socod hubi inaad taas qorshaha ku darsato haddii ay muhiim tahay in qof caawiya loo sameeyo.
- Badbaadadada dabku gurigu waa u muhiim qoyska oo dhan isdiyaarintuna waxay ka hortaktaa masiibada.

WIXII ARRIN DEGDEG AH TILIFOONI 000